



## Kusoo Dhawar, Dayrta.

Kali waa wargayska sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaana loogu talo geley in bushqada Washington ee waxbarashada hore uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormar Xirfadeed](#).

---

## Wargeyskan...

- [Balaadhin Halitaanka Daryeelka Ilmaha Inta Lagu Jiro COVID-19](#)
- [Daryeelka Ilmaha ee Xaalada Degdeg ah WAC \(Emergency Child Care WACs\)](#)
- [Wax Ka Baddalka Tabobarka](#)
- [Fursadaha Waxbarasho](#)
- [Wargayska Cusub: Kordhinta Goobta Shaqo \(Growing the Workforce\)](#)
- [Caawinta Shaqaalaha Barashada Hore Ee Waxbarashada](#)
- [Abriil Waa Bisha Kahortaga Tacadiga Ilmaha](#)
- [Fariin ka socota Xogyahaha DCYF](#)
- [Tirakoobka 2020](#)
- [Coronavirus - COVID-19 Macluumaadkiisii Ugu Danbeeyay](#)
- [Sidee Ayaynu Nahay?](#)

---

## Balaadhin Halitaanka Daryeelka Ilmaha Inta Lagu Jiro COVID-19

DCYF waxay hirgelinaysaa taageero goobta shaqada ah oo markaa lagaga jawaabay COVID-19. Dadaalka bixiyayaasha liisanka haysta ee daryeelka caruurta waxa ay u baahan tahay shaqaale dheeraad ah oo laga helo [kaydka badalka gobolka](#).

Yoolku waa in laga jawaabo COVID-19 saamaynta uu ku leeyahay daryeelka ilmaha iyada oo:

- La bixinayo badal iyo xidhiidh kale oo ay heli karaan iyo in shaqaalaha danaynaya ay buuxiyaa baahida shaqaalaha yar ee barnaamijka liisanka haysta ama kordhinta awooda (kaabista musharka gobolka)



- Barnaamijyada xidhiidhka waxa heli kara shaqaalaha taageerada wakhtigan (mushakar aanu kaabin gobolku)

Hadii aad u baahan tahay inaad noqoto shaqaale badal ah xarunta liisanka haystada, waxa aad kala xidhiidhi kartaa [Imagine Institute](https://www.imagineinstitute.org) 206-492-5249 ama iimeelka [subpool@imaginewa.org](mailto:subpool@imaginewa.org).

---

## Daryeelka Ilmaha ee Xaalada Degdeg ah WAC (Emergency Child Care WACs)



Talaabooyinka wax ku oolka ah waxaa kamid ah nidaamka iyo macluumaadka ugu danbeeyay ee WAC ee la hirgeliyay si markaa looga taageero bixiyayaasha daryeelka ilmaha kuwaas oo u shaqeeya qoysaska iyo shaqaalaha daruuriga ah ee u baahan adeegyada daryeelka ilmaha wakhtigan xanuunka.

Ka akhri Macluumaadkii [Ugu Danbeeyay ee Daryeelka Ilmaha ee Xaalada Dgedeg ah ee WACs halkan](#).

---

## Wax Ka Baddalka Tabobarka

### Xeerka Loo Sameeyay Dhabada Tobobarku Ku Salaysan ee Bulshada

Madasha Xeerka 2020 way dhamaatay iyo [SHB 2556: Siinta kaalmada joogtada ah ee bixiyayaasha hore](#) waxaa la sameexay Abriil 3 oo waxa ay dhaqan geleysaa Juun 11, 2020.

Xeerkan waxa uu u sahlayaa DCYF inay samayso tobobar bulshada ku salaysan oo markaa lagu qiimaynayo dhabada si markaa loo buuxiyo shuruudaha agabka waxbarashada oo liisan haysta oo shahaadooyinka hore ee gaaban ah.



- **Iminka Maxaa Socda?**
  - DCYF waxay la shaqaynaysaa ciday gacan saarka leeyihiin, oo ay ku jiraan Wacyi Gelinta Daryeelka Ilmaha Washington (Child Care Aware of Washington), Imagine Institute, Ururka Daryeelka Ilmaha ee Washington (Washington Child Care Association), SEIU 925, Ururka Daryeelka Ilmaha Qoyska Washington (Washington Family Child Care Association) iyo Gudida Maamulka Washington ee Kuuliyadaha iyo Kuuliyadaha Farsamada (Washington State Board of Colleges and Technical Colleges) si markaa ay u bayaamiyaan qaabka bulshada ku salaysan iyo sida loo bixinayo.
- **Maxaa Xiga?**
  - Ikhtiyaarkan ayna dayntu ku kordhaynin waxa laga heli karaa Xagaaga 2021.
- **Sidee ayuu xeerkan u saamayn doonaa wakhtiga waxbarashada?**

- DCYF waxa ay kordhin doontaa mudada ilaa Agoosto 1, 2026, si markaa bixiyayaashu u dhamaystiraan shuruudaha liisanka ee shahaadada hore ama gaaban.
- **Maxaan samayn karaa si aan macluumaad dheeraad ah u helo?**
  - Si aad u barato shuruudo badan oo waxbarashada ah, oo aad u aragto macluumaadka ugu danbeeya, booqo [bogeena Hormarka Xirfada DCYF](#). Booqo websaytka xeerka si aad u akhrido [goraalka dhan ee xeerka](#).



## DCYF Waxay Joojinaysaa Tobobarka Dadka Foolka Fool Loo Siinayo

DCYF waxay joojinaysaa tobobarka foolka foolka loo siinayo dadka iminka ilaa Maajo 31, 2020.

Talaabooyinka loogu hogaansamayo amarkii Badhasaabka ee [Joogitaanka Guriga, amarka Joogitaanka Guriga](#) iyo sidoo kale tilmaamaha kala fogaanshaha ee Xarunta Kahortaga iyo Xakamaynta Xanuunada Maraykanka (United States Centers for Disease Control and Prevention, [CDC](#)).

[Waxa aad akhridaa macluumaadka dhamayskatiran ee tobobarka.](#)

## Waxa aad kordhisaa Helitaanka Daryeelka Aas Aasiga ah ee Ilmaha

DCYF waxay dhaqan gelisay manhajka Aasiyaadka Daryeelka Ilmaha (Child Care Basics, CCB) kaas oo markaa lagu bixinayo online ahaan daa'qada tobobarka onlineka ah ee DCYF. Qodobu muhiim ah oo ku saabsan ikhtiyaarkan cusub:

- Waxaa la kordhiyay ilaa xagaaga 2020 - waxa aad heshaa ikhtiyaar la iskaga duwaan gelinayo MERIT
- Waxaa lagu siiyaa bilaash bixiyayaasha
- Waxa uu buuxiyay shuruudaha tobobarka Federalka
- Waxa uu kordhiyaa macluumaadka uu ku jiro maskaxda in dhana aan loo xaglinin



Si aad wax uga ogaato dhawrka dariiqo ee aad u buuxin karto shuruudaha booqashada [Aasiyaadka Daryeelka Ilmaha La Dhameeyay \(Completing Child Care Basics\)](#).



## Hormarka Xirfada Xidhiidhka Ku Salaysan (Relationship-Based Professional Development, RBPD)

Waxaa dhici karta inaad aragtay sida inta badan ay ugu soo jeedaa kooxda Hormarka Xirfadu RBPD.

DCYF waxaa ka go'an inay dhiso xidhiidh kala duwan oo markaa ku salaysan sidii loo xaqiijin lahaa in dhamaan bulshooyinka heerarka kala duwan ee ku jiraa ay u heli lahaayeen adeegyada shakhsi

ahaaneed, oo masuuliyad ah oo wax ku ool ah. Dadaalkani waxa uu hore inoogu socodsiinayaa aragtida DCYF ee dhamaan caruurta iyo qoysaska kuwaas oo markaa leh fursada ay kaga faa'idaysanayaan oo loo diyaariyay.

[Waxa aad wax badan ka ogaataa sida shaqada loogu guto nidaamka RBPD](#) ama daawo [Abriil webinar-ka diirada lagu saarayo RBPD](#).

---

## Fursadaha Waxbarasho



Taxanaha Webinar Dayrta oo dhamaystiran.

Webinar-ka Maarso waxaa diirada lagu saarayaa tobobarka Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha ee waajibka ah sidoo kale Abriil waxaa diirada lagu saarayaa Hormarka Xirfada ee Xidhiidhka Ku Salaysan.

Hadii ay ku dhaafaan webinarada Maarso iyo Abriil, waxa aad ka heli kartaa boga DCYF ee [Wargayska iyo Webinars](#).

---

## Qorshee Mihnadaada ee Daaqada Qorshaynta Mihnadaada

- Talaato, Maajo 19 | 6 galabnimo.
- [Iska duwaan geli webinar](#)



## Buuxinta Shuruuradaha Tobobakra ee Nidaamka Hogaanka

- Talaato, Juun 16 | 6 galabnimo.
- [Iska duwaan geli webinar](#)

---

## Milicsiga Duwaanka Hore

Ma waxaad iswaydiinaysaa mawduucyada lagu soo qaadan doono Hormarka Xirfadaha webinar-ka? Dhawr mawduuc oo ay ku jiraan:


- [Tobobarka Naxariista](#)
- [Guudmarka Shahaadooyinka Shaqaalaha](#)
- [Dhaxsocodka Qaybta Websaytka Xarunta ee MERIT](#)
- [Aasaasiyaadka MERIT](#)



Liis dhamaystiran, oo ay ku jiraan wakhtigan fiidyawga la samaynayo, waxaa laga heli karaa [boga Wergeyska iyo Webinars](#).

---

## Wargayska Cusub: Kordhinta Goobta Shaqo (Growing the Workforce)



Miyaad tahay shakhsi bixiya taageero waxbarasho oo xirfadle?

Wargeyska Shaqaalaha ee Koraya waxaa weeye khayraad dhamaan shakhsiaadka kaas oo markaa ka taageera barashada xirfadaha ee shaqaalaha waxbarashada hore.

[Waxa aad eegtaa Nuqulka Abriil.](#)

Hadii aad doonayso inaad isku duwaan geliso wargeyska, iimeel u dir [Marlene White.](#)

---

## Caawinta Shaqaalaha Barashada Hore Ee Waxbarashada

### Hay'ada Dadaalka Kuuliyada Bulshada Online ahaan

Iyada oo uu weli lagu dhaqmayo tilmaamaha kala fogaanshaha dadka, kuuliyadaha bulshada iyo farsamo ee Washington waxa ay bixiyaan duruus online ah oo Waxbarashada Caruurnimada Hore ah.

Ardayda qqata deeqda Lacagta Early Achievers ma saamaynayso u qalankooda hadii cida ay u shaqaysaa ay badalaan ama ay ka dhax galaan taxadirka coronivurs. Xarunta iyo shaqaalaha waxaa ay ka qayb galayaan xal ikhtiraac oo markaa si dhaanta loogu shaqaynayo ardayda.



---

### Ka Hadalka Deeqda Lacagta...



Miyaad ogtahay in DCYF ay bixiso deeqo waxbarasho iyo lacageed, oo ay siiso dadka barnaamij ku jira Early Achievers u shaqeeya?

Waxa aad ka ogaan kartaa halkan deeqda:

- [Ingiriisi](#) | [Isbaanish](#) | [Somali](#)

## Shahaadada La Qaadan Karo ee Waxbarashada Caruurnimada Hore

Shahaadada La Qaadan karo waxaa weeye qaab wanaagsan oo markaa loo bilaabi karo mihnada ECE. Shahaadooyinku midba midka kale ayay ku dhisan tahay oo waxaa lagu bixiyaa kuuliyada bulshada ee gobolka oo dhan.

[Waxa aad ka ogaataa wax badan oo soo dejiso daabacaadii ugu danbaysay.](#)



## Qiimayta Waxbarashada Caruurnimada Hore ee WA

Diseember 2019, the [Gudida Maamulka Gobolka ee Kuuliyada Bulshada iyo Farsamo \(State Board for Community and Technical Colleges\)](#) waxay qabteen xog uruurin si loo qiimeeyo helitaanka iyo gelitaanka duruusta Waxbarashada Caruurnimada Hore iyo shahaadada kuuliyada bulsho iyo farsamo ee Washington.

Barnaamijku waxa uu si kooban u bixiyaa macluumaadka ku saabsan luuqado, gelitaanka fasalada iyo deeqaha.

## Qorshee Mihnadaada ee Daaqada Qorshaynta Mihnadaada...

Ha seegin! Bisha xigta waxa aanu bixin doonaa baahin toos ah oo webinar ah oo marka diirada saaraysa [Daaqada Qorshaynta Mihnada ECE \(ECE Career Planning Portal\)](#).

Albaabku wuxuu kaa caawin karaa inaad qorsheyso mustaqbalkaaga, waxka barato wadooyinka mustaqbalka ee waxbarashada caruurnimo hore oo aad baadho dookhyada waxbarashada.

- Talaato, Maajo 19 | 6 galabnimo.
- [Iska duwaan geli webinar](#)





*“Waxaa jiri wakhtiyo in la joojiyaa aad moodo ikhtiyaarka ugu wanaagsan oo mar kasta waxay igu dhiiri gelinayeen macalimiintu in aanan sidaa samaynin. Waxaan xidhayaa AA gayga iminka markaa waxa aan uga mahadnaqayaa iyaga maadaama oo ayna iga yeelin in aan is dhiibo.”*

- Ardayga Waxabarashada Hore ee Caruurnimada iyo Dadka Qaata Lacagta Early Achievers

## Waxbarashada iyo Deeqda Waxbarashada DCYF

Si lagu ogeysiyo barnaamijyadan iyo kheyraadyo waxbarasho, khayraadka iyo deeqda booqo boga [DCYF Waxbarasho iyo Deeqyo Waxbarasho](#).



## Abriil Waa Bisha Kahortaga Tacadiga Ilmaha



Si aad gacan uga gaysato ololaha Bisha Kahortaga Tacadiga Caruurta, oo aad caruurta u siiso wax inta lagu jiro Amarka Joogitaanka Guriga, Caafimaad Qab, oo aad u Xoojiyo kooxda Qoysaska ee markaa qabanaysa [ololaha midabaynta](#) oo aad u wadaagto buuga cusub ee lasoo dejiisan karo [ee midabaynta/hawlaha](#).

Waxa aad daabacataa bogaga midabka ee midabka boga hore, kadib waxa aad iimeel u dirtaa adiga oo sawirtay ama sawir aad ka qaado midabayntaada [strengtheningfamilies@dcyf.wa.gov](mailto:strengtheningfamilies@dcyf.wa.gov).

DCYF waxa ay qorshaynaysaa inay soo dhigto baraha bulshada bisha oo dhan oo dhamaadka bisha waxa aanu u qori tuuri doonaa abaal marin wayn - Baro Wadooyinka Beeraha Nasashada Washington iyo wadooyinka Olympia Hands ee Children's Museum.

- [Soo dejiiso bogaga midabaynta](#)

Waxa aad sidoo kale soo dhigi kartaa wixii hawl ah ee la dhameeyay daaqada si ay u arkaan jaarku!

## Fariin ka socota Xogyahaha DCYF

Xogyahaha DCYF Ross Hunter waxa uu inala wadaagay fariinta bisha si uu markaa inoo siiyo macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo [waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).


- [Wargeyska Abriil](#)
- [Wargeyska Maarso](#)
- [Wargeyska Febraayo](#)

Hadii aad heyso wax suaal ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiska Xidhiidhaha](#).



---

## Tirakoobka 2020



Yaan lagaa tegin. Maalinta Tirakoobku waxay ahayd Abriil 1 oo ilaa iminka, badanaa qoysasku waxa ay heleen ugu yaraan hal casuumad oo markaa ay ka jawaabayaan oo Tirakoobka 2020 ah.

Jawaabaha tirakoobku waxa uu muhiim u yahay maadaama oo uu inaga caawinayo in aanu sheegto deeqaha adeegyada muhiimka ah ee bulshada sida barnaamijka waxbarashada iyo dugsiyada, isbitaalada iyo daryeelka caafimaadka, wadooyinka iyo biriishyada, iyo xaalada degdega ah iyo ka jawaabida masiibooyinka.

**Khayraad Dheeraad ah oo Tirakoobka 2020 ah:**

- [Waxa Ay Tahay In Boosta Laga Eego](#)
- [Khayraadka Taageerada Luuqada](#)
- [Calaamadso Taariikhdaada: Taariikhda Muhiimka ah](#)

---

## Coronavirus - COVID-19 Macluumaadkiisii Ugu Danbeeyay



DCYF waxa ay leedahay websayt u gaar ah [Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Coronavirus - COVID-19](#). Su'aalaha la xidhiidha COVID-19 waxaa loo diri karaa [dcyf.covid-19@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.covid-19@dcyf.wa.gov). Sanduuqan maalin kasta ayaa lala socdaa.

### Khayraadka dheeraadka ah waxaa kamid ah:

- [Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington \(Washington State Department of Health, DOH\)](#)
- [Xarunta Xakamaynta iyo Kahortaga Xanuunada Maraykanka \(United States Centers for Disease Control and Prevention, CDC\)](#).

---

## Sidee Ayaynu Nahay?

Fadlan noo sheeg sida aanu wax u wadno adiga oo galaya [xog uruurintan kooban](#).

Hadii aad qabto su'aalo, mawduucyo aad doonayso inaad nala socodsiiiso ama aad doonayso inaad nala wadaagto macluumaadka ugu danbeeya ee barnaamijka si markaa aanu ugu soo darno wargeyska xiga ee PD, waxaad lasoo xidhiidhaa [Marlene White](#).

